Braybrook College

# IMAANSHAHA DUGSIGA

Somali

## Sua'aalaha iyo Jawaabo Lagu Wargelinayo Waalidiinta

### Imaanshaha dugsigu ma qasab baa?

Haa- Waa ku qasab in ardaydu dugsiga dhigtaan ilaa da'da 17. Sidoo kale, waalidiinta waxaa sharci ahaan looga baahan yahay inay hubiyaan in ilmahoodu dugsiga tago maalin kasta. Waxaan rabnaa ardaydayada Braybrook College inay dugsiga tagaan maalin kasta, inay yimaadaan wakhtiga ka hor 8:50 subaxnimo, joogaan dugsiga ilaa 3:06 galabnimo oo ay si buuxda ugu hawlan yihiin barashada fasalka. Waxaan fahamsanahay in maalmaha qaar ardaydu ay dareemi karaan jirro, ama ay jiri karaan xaalado qoys oo aan la filayn. Si kastaba ha ahaatee, guud ahaan, ardaydu waa inay dhigtaan dugsiga.

**Hal-ku-dheggina waa: Maalin kasta waa muhim, fasal kasta waa muhiim, daqiiqad kasta oo fasalkana, waa muhiim.**

### Miyaan u baahanahay inaan dugsiga ogeysiiyo in ilmahaygu maqan yahay?

Haa- Haddii ilmahaagu maqan yahay, waxaan u baahanahay inaan ogaano sababaha ay u maqan yihiin si aan u fahamno baahiyaha ilmahaaga oo aan ku taageerno ilmahaaga inuu ku soo laabto dugsiga sida ugu dhakhsaha badan.

### Ma jiraan maqnaansho oo maamulaha dugsigu oggalaaday ?

Haa- Waxaa jira maqnaansho qaarkood oo dugsigu oggalaaday. Maqnaanshaha 'Dugsiga la ansixiyay' tusaale ahaan waa marka ardaygu daaho ama uu goor hore ka tago ballan caafimaad darteed. Tani waa sabab sax ah oo uu ansixiyay maamulaha dugsiga.

### Waa maxay sababaha maqnaanshaha dugsiga la ansixiyay?

Waxaan aqbalnay inay jiraan maalmo ay ardaydu ka maqnaan karaan. Waa kuwan qaar ka mid ah sababaha aan u maleyneyno in ardaydu ay ka maqnaan karaan dugsiga:

- Waxay qabaan hargab ama waxaad ku araktaa calaamadaha jirro waxayna u baahan yihiin inay ka fogaadaan bulshada – kuwani waa maqnaansho caafimaad. Haddii calaamadaha ilmahaagu sii jiraan, u kaxee ilmahaaga dhakhtarka oo noo keen caddayn caafimaad. Noo soo sheeg haddii ilmahaagu guriga joogo, lakakiin haddii aanay lahayn astaamo, ku dhiiri geli ilmahaaga inuu dugsiga yimaado. Tixraac waraaqaha loo soo diro qoyska maamulaha dugsiga eek u saabsan waxa la samaynayo haddii aad u malaynayso in ilmahaagu qabo cudurka Covid.
- Waxay u baahan yihiin inay aadaan ballan caafimaad tusaale ahaaan, si ay u arkaan dhakhtar ama dhakhtarka ilkaha. Haddi ay suurtagal tahay, isku day inaad ballanta dhigato wkahti ka baxsan saacadaha dugsiga. Hadii ballantu tahay xilliga dugsiga, horay noogu soo sheeg. Ballanta ka dib, na sii shahaado caafimaad. Waxaan kaa filaynaa inaad timaaddo dugsiga oo aad ilmahaaga ka saxiixdo Xafiiska Guud.
- Fasaxa qoyska oo la dheereeyay – waalidku wuxuu ogeysiiyay dugsiga oo ogolaaday "Qorshaha Waxbarasho Maqnaanshaha Ardayga". Haddii habkan aan la raacin, markaa maqnaanshaha waxaa loo diiwaangeliyaa sidii "Magnaansho Aan La Fasaxin oo Waalidka Doortay"
- Dhabaaldig Diinta/Dhaqankaaga Qabo – kuwaani waa la ansixiyay maamulaha, laakiin waxaad u baahan tahay inaad horay u sii ogeysiiso dugsiga.
- Magnaanshaha Waalidka doortay oo la ansixiyay – waxaan fahamsanahay in mararka qaarkood ay jiraan xaalado ka baxsan xakamaynta, sida qof qoyska ka mid ah oo xanuunsan

### Waa maxay sababaha maqnaanshaha ee aan dugsiga la ansixin?

Maalin kasta kaliyeyaasha Maamulkayadu waxay wacaan qoysaska si ay ula socdaan maqnaanshaha ardayda. Maqnaanshaha "dugsiga lama ogola" marka sababtu aanay ansax ahayn, tusaale ahaan, hadii aad noo sheegto in ilmahaagu soo shoobin aado, booqanayo saaxiibbada, ama u dabbaaldegaya dhalashadooda, waxaanu u qaadananaa in aanay sababahan ansax ahayn maqnaanshaha mooyaane. Sababta maqnaanshaha ilmahaaga, waxaanu ku qoreenaa rikoodka: Maqnaansho Waalidka Doortay (oo aan la ogolayn).

**Maxaa dhacaaya haddii ilmahaygu soo daaho ama u baahan yahay inuu goor hore ka tago dugsiga?** Waxaan fahamsanahay in mararka qaarkood ay jiraan duruufo lama filaan ah oo u diidaya ardayda inay ku yimaadaan dugsiga waqtigii loogu talagalay. Inaad na siiso tafaasiisha sababta ilmahaagu u daahay ama sababaha ay ugu baahan yihiin inay goor hore ka tagaan dugsiga waa mid aad muhiim u ah taas oo qayb ka ah waajibaadkayaga daryeelka ardayda. Si kastaba ha ahaatee, waxaanu ku dhiirigelinaynaa waalidiinta/masuulka inay sameeyaan wax kasta oo ay awoodaan si ay uga hortagaan in duruufahaas ay dhacaan. Isku-duwayaasha Heerka Sannadku waxay la socon doonaan ardayda soo daaha sabab la'aan. Xiritaannada waxay khuseeyaan imaatinka dugsiga daahsoon haddii aan la oggolaan. Haddii ardaygu ka daahdo dugsiga dhawr jeer, waxaanu la xidhiidhi doonaa qoyska si aanu u samayno qorshe ay fasalada oo dhan ku xaadiri lahaayeen wakhtiga loogu talagalay.

### Sideen u ogeysiiyaa inuu ilmahaayga dugsiga ka maqnaanaayo?

**Waxaa jira laba siyaabood oo aad ku ogeysiin karto ilmahaayga maqnaanshahooda dugsiga.**

1. Iskoolka lambarkaan ka soo wac (03) 9312 2900
   Inta lagu jiro Saacada Dugsiga – **weydii inaad la hadasho Attendance/ Tracking Officer, Katie Stathakopoulos**
   Saacadaka Dugsiga Kadib – **Taabo 1 si aad fariin u duubto inuu ilmahaagu maqanaandoono**

2. Geli maqnaanshaha ilmahaaga adoo maraya **Xariirka Waalidka ee Compass.**
   Wac dugsi hadii aad u baahan tahay caawitaan.



**Sara Allen**
Administration Assistant
(Year 7 & 8 Sub-school)
First Aid Officer



**Katie Stathakopoulos**
Administration Assistant
(Year 9 & 10 Sub-school)
Attendance/Tracking Officer



**Tuyen Trinh**
Administration Assistant
(Year 11 & 12 Sub-school)

**ARDAYDA WAA INAY ISKUUL IMAADAAN MAALIN WALBA OO KALIYA KA JOOGAAN SABABAHA ANSAX AH.**